



Jawiga u Caadiga ah waxuu Saacidayaa Howlaha ka Hortagga hore

Natural Environments Support Early Intervention Services—Somali Version

Ilmaha yar yar oo idil waxey si wanaagsan ugu kobcaan marka ay joogaan jawi ay garanayaan, oo ay ku dhex jiraan dadka iyo alaabta ay xiiseynayaan. Ilmaha dib u dhaca leh, jawigaa ku heeraarsan ee u caadiga ah, oo ay ku kalsoon yihiin ayaa ah mid lama huraan u ah howlaha ka hortagga hore. Jawigaa oo loo yaqaan jawiga caadiga ah “natural environments”, ayaa ah mid ay ilmahu ku tababaran karaan xirfado cusub, oo ay ka heli karaan faaiidooyin buuxa, ee xagga howlaha ka hortagga oo ay dadka taqasuska ah fuliyaan.

Jawiga caadiga ah waa mid aan ku koobneyn dad, meelo iyo qalab keliya. Waa kheyb lama huraan u ah xuquuqaha ilmahaaga u leeyihiin in ay kheyb ka qaataan, howlaha ka hortagga ee waxbarashada gaar ahaaneed, ee hoos yimaada qeybta C ee sharciga federaaliga ah. Sharcigaa oo loo yaqaan; Sharciga Waxbarashada Dadka Naafada leh (Individuals with Disability Education Act) IDEA.

Waalid badan ayaa is weydiiya jawigaa caadiga ah waxuu yahay, habka ay ilmahooda u caawin karaan iyo doorarka ay ka ciyaarayaan. Kuwan soo socda waa jawaabaha su'aalaha inta badan la is weydiiyo.

Waa maxay jawiga caadiga ah?

Jawiga caadiga ah waa meel walba ee ilmahaada iyo qoyskaaga deggan yahay, wax ku barto, kuna ciyaaro. Waxaa ka mid ah:

- Meelo, sida gurigaaga, bannanka guriga dabadii, ama shaqada. Meelaha waxaa kaloo ka mid noqon kara, xannaanada ilmaha, guri ehel leeyahay, halka ilmahu ku ciyaaraan, dukaanka cunnada laga iibsado, ama maktabadda.
- Qalbka, waxuu noqon karaa wax allaala iyo waxii jawiga ilmahaaga ay joogaan laga hela—alaabta ilmahu ku ciyaaraan, dhagax, buugaag, wiifow, cooska, macalgad, kursi dheer, ama gaariga ay jecelyihiin in ay ku ciyaaraan.
- Dadka, sida waalidka, walaalaha, ehelka, saaxiibada, deriska, macalimiinta, iyo qof walba oo ilmahaagu la macaamiiltama.
- Xirfado wax qabad ee isku xiraya xiisaha iyo jadwalka qoyska iyo ilmahaaga ka dhaxeeya. Kuwan waxaa ka mid noqon kara, xirfado maalmeedka sida cunto cunidda, qubeyska, iyo lebiska. Madadaallo sida ciyaarta, akhriska, socodka, dabaasha, iyo aadista bannaanka ilmaha lagu ciyaarsiiyo. Waxaa kaloo ka mid noqon kara, nolosha jaaliyadda aad ku nooshahay, sida aadidda masjidka, u dabaaldegga ciiddaha, waxyaabaha dhaqan ahaan qoysku qabto, aadista suuqa laga adeegto iyo raacista gaadiidada kala duwan.

Maxuu jawiga caadiga ah muhiim u yahay?

Jawiga caadiga ah waa mid waqti walba, ee la maraya maalinta, u fududeynaya ilmahaaga in ay helaan fursad ay xirfad cusub ku bartaan, kagana mid noqdaan ilmaha kale. Taasi waa muhiim, sababta oo ah marka ilmahu ku mashquulan yihiin ficilo maalmeedkaa, oo ay ku ciyaarayaan allabo ay xiiseynayaan, waa marka habka ugu wanaagsan oo ay wax u bartaan. Jawiga caadiga ah waxuu ilmahaaga ka caawiyaa, in ay ku deyaan xirfadaha iyo dhaqanka ilmaha kale iyo dadka qoyska ka mid ah. Waxuu kaloo ilmahaaga u sahlayaa in ay qoyska la tababartaan xirfado cusub.

Sharcigee saacida jawiga caadiga ah

Fikradda ah in la isticmaalo jawiga ilmaha u caadiga ah waxuu si toos ah uga yimaadaa qeybta C ee sharciga IDEA. Sharcigu waxuu farayaa:

- Howlaha dhexdhexaadinta hore (early intervention services) in lagu fuliyo Jawiga caadiga, oo uu ka mid yahay guriga ama jaaliyadda. Jawigaa ee ilmaha kale ee aan dib u dhaca laheyn ilmahaagu la mucaaltimayo inta ugu badan ee munaasabka ah.
- Jawiga caadiga ah waa halka ilmaha caado ahaan kula korayo ilmaha kale ee aan dib u dhaca laheyn.

Gobolku waa in uu lahaadaa sharciyo si cad u qeexaya marka aysan munaasab aheyn in ilmaha howlaha loogu fuliyo jawigaa caadiga u ah. In laga saaro ilmaha jawigaa waxaa keliya oo la ogolyahay, hadii aan ilmahu horumar ku gaareen jawiga in lagu hayo.

Doorkee waalidka iyo kooxda fulisa howlaha hore ee shaqiga qoyska u ah ka ciyaaraan?

Inta la dejinayo qorshaha howlaha qoyska u qaaska ah, kooxdu waa in ay qoyska u fidisaa, howlo u gaar ah baahida qoyska iyo ilmahooda dib u dhaca leh. Go'aaminta howlaha waxa ay yihiin iyo halka lagu fulin doono, ayaa ah doorka kooxdu ka ciyaareyso, go'aankaana waa in waalidku ka mid ahaadaa.

Waalidka iyo dadka ka tirsan kooxda fulisa howlaha wax u qabadka hore, ayaa u xil saaran in ay aqoonsadaan goobaha ilmahaaga u ah jawiga caadiga ah. Kooxda ayaa kaa caawin karta meelaha kale ee loo qadarin kara jawiga caadiga ah ee ka mid ah jaaliyadda.

Wax siyaado ah ka ogow

Haddaad dooneyso akhbaaro siyaado ah in aad ka ogaato jawiga caadiga ah, waxaad booqataa [PACER.org/newsletters/ec/summer08.pdf](https://www.pacer.org/newsletters/ec/summer08.pdf). Mawduuca jilaalkii 2008 laga qoray amuuraha wax u qabadka hore "Early Childhood Connection". Mawduuca oo loogu tala galay qoyska deggan Minnesota ee leh ilmo dib u dhac leh.